

# OHP iyo coronavirus-ga novel (COVID-19)



## Xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon waa la caymiyey

Miyaa OHP iyo baahida laga baarayaa COVID-19? Waa la caymiyey. Ma baahan tahay inaad guriga joogto sababtoo COVID-19 awgeed? Taasina waa la caymiyey sidoo kale.

- Ma u safreysaa meel gobolka ka baxsan? Baaris iyo isbitaal seexin degdeg ah oo loogu talagalay COVID-19 waa la caymiyey.
- Ma qabtaa CAWEM? CAWEM waa caymis gurmada keliya ah. Muddada lagu jiro xaaladdan degdegga ah ee qaran, baaritaanka iyo cusbitaal dhigista waa la daboolaa, xiitaa haddii aadan daryeel ka helin waaxda xaaladda degdegga ah.
  - Haddii aad leedahay caymiska CAWEM ee haweenka uurka leh (sidoo kale loo yaqaan CAWEM Plus) sidoo kale waa lagu daboolay baaritaanka iyo cusbitaal dhigista.

## Caymiskaga OHP ma dhammaan doono inta lagu jiro xaaladan degdeg ah ee qaran



Caafimaadkaaga muhiim ayuu noo yahay. Laga soo billaabo Maarso 18, 2020, haddaad qabto OHP, waa lagu caymiyey. Waa lagaa caymiyey xittaa haddii aad hesho warqad dhahaysa OHP wuu xirmayaa ama uma qalantid Macaashka OHP lama xiri doonto.

## Lacag-bixinta degdegga ah ee dowladda ma beddeleyso u-qalmitaankaaga OHP



Dowladda federaalka ayaa direysa jeegag dhiirigalin ah si ay uga caawiso qoysaska inta lagu jiro xaaladda degdegga ah COVID-19. Waxaa sidoo kale kordhaya lacagaha shaqo la aanta. Kordhinta iyo dhiirogelinta shaqo la'aanta ma saameyn doonto u qalmiddaada OHP. Lacagtan lama tirin doono markaad dalbanayso ama soo sheegayso isbedel ku dhaca reerkaaga.

## Ku hel daawada lagu soo qoray boosto ahaan halkii aad ka aadi laheyd farmashiyaha

Xubnaha OHP waxay daawooyinka badan ee loo qoray waxay ku heli karaan boosto ahaan. Weydii farmasigaaga haddii ay kuugu soo diri karaan daawadaada lagu soo qoray qaab lacag la'aan ah.

Hadaad u baahan tahay caawinaad, wac CCO-gaaga oo waydii wax ku saabsan adeegyada farmasiiyada amar-bixinta. Waxa kale oo aad ka hubin kartaa buuggaaga xubinta si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Ka hel macluumaadkaaga xiriiriyaha 'CCO' iyo buug-gacmeedka halkan <http://bit.ly/CCOplans>.



Haddii farmashigaagu kuu soo diri waayo daawadaada lagu soo qoray, waad isticmaali kartaa Adeegga Daawada lagu soo qoray ee Boostada. Wac 800-552-6694 ama aad [www.ppsrx.com](http://www.ppsrx.com) si aad isu diiwaangeliso.

## Ha iska dhameyn daawooyinka muhiimka ah, soo buuxso laba toddobaad ka hor



Waa muhiim inaad ku sii wadatid qaadashada daawooyinka sidii loogu talagalay. Soo buuxso daawooyinkaaga muhiimka ah ugu yaraan laba toddobaad kahor intaadan dhammeyn. Waad weydiisan kartaa sahay degdeg ah. Farmasiyada ayaa kaa caawin kara. Haddii farmashiyaha uu yiraahdo waa goor hore "aad u dhaqso badan", u sheeg inaad hada ubaahantahay buuxin xaalada degdega ah ee COVID-19 awgeed.

## Guriga joog oo adeegso telefoonka, fiidiyaha, iyo ballamaha internetka



Waad sameysan kartaa ballamo, oo la hadli kartaa bixiyeyaashaada, oo daryeel heli kartaa adigoo gurigaaga ka tegin. Tani waxaa lagu magacaabaa "telehealth" (caafimaadka teleefanka) waana u bilaash xubnaha OHP. Kala hadal dhakhtarkaaga ama bixiyeyaasha kale wixii ku saabsan samaynta ballanta teleefonka caafimaadka. Waxaad kaloo weydiin kartaa CCO-gaaga.

Haddii aad u baahan tahay turjubaan ama caawimaad luqad kale ama qaab ah, u sheeg bixiyahaaga. Waxay u joogaan inay caawiyaan.

## Ma u baahan tahay caymis caafimaad? Ka codso [ONE.Oregon.gov](https://www.oregon.gov) maantaba



Inta lagu jiro xaaladdan deg-degga ah ee qaran, waxaa muhiim ah inaad fursad u hesho daryeelka caafimaad ee aad u baahan tahay. Qorshaha Caafimaadka Oregon waa caymis caafimaad oo bilaash u ah kuwa u qalma. Waad heli kartaa OHP xitaa haddii horey lagu diiday.

Codsashada OHP way ka fududdahay sidii hore. Ka codso [ONE.Oregon.gov](https://www.oregon.gov) ama wac 800-699-9075. Wakhtiga la sugayo wuu dheeraan karaa. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa caawimaad bilaash ah lammaanaha bulshada deegaanka. Mid ka hel <http://bit.ly/ohplocalhelp>.

## Waxbadan ka baro COVID-19 iyo waxa ka dhacaya Oregon

- [Qorshaha Caafimaadka Oregon & COVID-19](#) macluumaadkooda xubnaha.
- [Maamulka Caafimaadka Oregon COVID-19 cusboonaysiinta](#) ku saabsan kiisaska, hagida, su'aalaha guud iyo wixii intaa ka badan.
- [DHS COVID-19 cusboonaysiinta](#) ku saabsan macaashka cunnada, gargaarka degdega ah iyo in badan.
- [Macluumaadka COVID-19 ee Qaranka](#) ee Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada.